URURADA KU TAAGEERI KARA Malta waxay hoy u tahay dhowr hay'adood, adeegyo iyo ururo LGBTIQ ah oo kuugu caawin kara ama ku siin kara macluumaad.

Nooca Galmada, Aqoonsiga Jinsiga, Muuqaalka Jinsiga iyo Astaamaha Jinsiga (SOGIGESC), waxay ka mid tahay Agaasinka Xuquuqda Aadanaha. Waxay kula talineysaa dowladda inay hubiso in sharafta aadanaha la ixtiraamo iyadoo aan loo eegin qofka aqoonsigiisa LGBTIQ.

Hay'adda Caalamiga ah ee Ilaalinta waa hay'ad dawladeed oo mas'uul ka ah qabashada iyo baarista codsiyada magangalyada caalamiga ah. Badbaadinta caalamiga ah waxay ka dhigan tahay in ka-faa'iideystayaasha laga ilaalin doono inay si qasab ah ugu noqdaan dalkooda ay ka yimaadeen sababo la xiriira dhibaatooyinka la xiriira cadaadiska iyo / ama ku tumashada xuquuqda aadanaha ee daran. Dadka LGBTIQ-da ah waxaa lasiiyay magangalyo caalami ah waxaana laga ilaaliyay inay ku noqdaan dalalkii ay ka yimaadeen halkaasoo loo gartay inay qatar ugu jiraan waxyeelo.

Ujeedada ugu way ee xaffiiska**Wakiilka Sare ee Qaramada Midoobay u Xilsaaran Qaxootiga** ee Malta waa u doodista helitaanka ilaalinta shuruudaha ku habboon iyo kor u qaadista xalalka waara ee dhammaan dadka ay khuseyso. Waxay u ololeysaa nidaamka magangalyada u nugul ilaalinta waxayna sidoo kale ka shaqeysaa xoojinta awooda dalka ee wax ka qabashada qulqulka muhaajiriinta. UNHCR waxay ka shaqeysaa sidii loo ilaalin lahaa qaxootiga LGBTIQ, magangalyo-doonka, wadan laaweyaasha iyo barakacayaasha gudaha.

Dhaqdhaqaaqa Xuquuqda LGBTIQ ee Malta (MGRM) waxay maamushaa **Adeegga Taageerada Rainbow** taas oo siiya taageero nafsaani-bulsho oo bilaash ah dhammaan dadka LGBTIQ iyo qoysaskooda. Adeeggu wuxuu kaloo bixiyaa goobo bulsho oo ammaan ah oo kala duwan oo bulshada ay kula kulanto iyada oo loo marayo martigelinta hawlo kala duwan.

Bulshooyinka Isbahaysiga Raibow (ARC) waxay isku dubaridaa oo abaabushaa dhacdooyinka PrideMalta, waxay kor u qaadaa wacyiga ku saabsan galmada iyo caafimaadka maskaxda, waxayna raadineysaa inay isku keento xubnaha bulshada LGBTIQ iyada oo loo marayo howlaha bulshada. ARC waxay maamushaa bogga 'LGBTIQ' **www.gaymalta.com** macluumaad ku saabsan wararka, dhacdooyinka iyo arrimaha la xiriira bulshada. Websaydhku wuxuu bixiyaa kalandarka LGBTIQ - dhacdooyinka ka dhacaya agagaarka jasiiradda.

aasaaska aditus waxay bixisaa talo sharciyeed iyada oo loo marayo Qeybteeda Pro Bono (gargaarka sharciga ee bilaashka ah) waxayna ku lug leedahay doodista hawlaha socda. Diiradooda ayaa ah ugu horeyn Malta, laakiin sidoo kale waxay ka shaqeynayaan sidii loo muujin lahaa cabirka xuquuqda aadanaha ee heer gobol iyo heer caalami ee Malta. Meelaha ey khibradda uleedahay waxaa ka mid ah socdaalka iyo sinnaanta LGBTIQ.

Drachma waa meel u furan dhammaan dadka doonaya is dhexgalka galmo iyo mid ruuxi ah. Waxaa ka mid ah dadka LGBTIQ, iyo sidoo kale asxaabta iyo qoysaska doonaya inay kulmaan si ay u wada duceystaan una sahamiyaan isgoysyada u dhexeeya galmada, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, caqiidada, ruuxiga iyo diinta. Waa koox inta badan dhiirrigelisay caqiidada Roman Catholic laakiin waxay u furan tahay dadka ka soo kala jeeda asalka diimaha kala duwan.

LASOO XIRIIRITAANKA

Hay'adda Aditus	2010 6295
Hay'adda Daryeelka Magangelyo-doonka	2568 7200
Aġenzija Appoġġ	2295 9000
Bulshooyinka Isbahaysiga Rainbow	9927 2999
Drachma	7925 3875
Rugta Caafimaadka ee Jinsiga	7950 0299
Rugta GU	2122 7981
Ururka Is Dhexgalka iyo Ka-Hortagga Midabtakoorka	2226 3210
Dhaqdhaqaaqa Xuquuqda LGBTIQ-da ee Malta	9925 5559
Ciidanka Booliska Malta	2122 4001
Adeegga Taageerada Rainbow	7943 0006
Hay'adda Caalamiga ah ee Ilaalinta	2125 5217
Ururka/Kooxda SOGIGESC	2226 3210
UNHCR	2248 9400
Taageerada Dhibbanaha Malta	2122 8333

Agaasinka Xuquuqda Aadanaha
A3 Towers, Level 0, Triq l-Arkata,
Paola, PLA 1211
Malta

+356 2226 3210
hrd@gov.mt
www.humanrights.gov.mt

UNHCR
The UN Refugee Agency

MINISTRY FOR JUSTICE, EQUALITY AND GOVERNANCE

PARLIAMENTARY SECRETARY FOR CIVIL RIGHTS AND REFORMS

Ka bilaabma saddexagalka casaanka ah ilaa qaanso-roobeedyada

SO

SOO DHAWOOW

IHaddii aad horay u soo aragtay midabada qaansoroobaada, dabadeed buugyarahan malaha adigaa laguugu talagalay. Waxaa laga yaabaa inaad dareemayso cabsi iyo kalino, aragtida calaamadda soo dhawaynta waxay kaa dhigi kartaa inaad dareento inaad timid meeshii saxda ahayd.

Waad ka dalban kartaa magangalyada caalamiga ah Malta hadii aadan ku laaban karin wadankaaga asalka ah sababtoo ah waa lagu dhibaateeyay, ama waxaad qatar ugu jirtaa in lagu dhibaateeyo. Tani waxay sabab unoqon kara jinsiyadaada, diintaada, dhalashadaada, xubinnimada koox bulsho oo gaar ah (tusaale ahaan inaad tahay LGBTIQ), ama ra'yi siyaasadeed.

Mar alla markii aad u gudbiso dalabkaaga Hay'adda Caalamiga ah ee Ilaalinta, waxaad helaysaa xaaladda magangelyo-doone, waxaadna xaq u leedahay inaad ku sii nagaato Malta illaa aad ka hesho go'aanka ugu dambeeya Waxaa lagu siin doonaa shahaado xaqiijinaysa heerkaaga.

Afeef: Buug-yarahaan uma diyaarsana inuu bixiyo talo sharci. Macluumaadka ku dhex jira wuxuu saxsanyahay taariikhda la daabacay.

Waxaa marka hore lagu weydiin doonaa faahfaahintaada aasaasiga ah iyo qaabkii aad ku timid Malta intii lagu jiray xareynta rasmiga ah ee dalabkaaga. Tan ka dib, waxaa laguugu yeerayaa wareysigaaga shakhsi ahaaneed ee sarkaal kiis halkaas oo ay tahay inaad si faahfaahsan u sharraxdo sababta (sababaha) ay ahayd inaad ka tagto iyo sababta aadan ugu laaban karin waddankaagii hooyo. Waxaad raadin kartaa caawimaad qareen inta hawshani socoto, oo ay kujirto wareysiga Hay'adda Caalamiga ah ee Ilaalinta.

Intaas ka dib, waxaad heli doontaa go'aan. Haddii uu noqdo mid oggolaansho ah, waxaad awoodi doontaa inaad sii joogto Malta. Hadday diidmo tahay, waxaad xaq u leedahay inaad hor-tagto Maxkamadda Rafcaannada Caalamiga ah iyo inuu ku caawiyo qareen. Waxaad sidoo kale codsan kartaa kaalmada sharciga ee ay xukuumadu ku bixiso bilaash.

LGBTIQ

Lesbian haweeney jidh ahaan iyo dareen ahaanba soo jiidanaysa dumarka kale.
Gay nin jir ahaan iyo shucuur ahaanba ragga kale soo jiita.
Labada jinsi qof kasta oo jir ahaan iyo shucuur ahaanba soo jiita dad ka badan hal jinsi.
Trans Qofka dareemaya in jinsiga loo qoondeeyay dhalashadiisa uusan u dhigmin jinsiga uu isku-aqoonsado.
Intersex kala duwanaansho xagga bayoolajiga ah oo qofka jidhkiisu aanu lab iyo dhaddig buuxa u ahayn, labaduba ama
Queer waa eray ay adeegsadaan qaar ka mid ah shaqsiyaadka LGBTIQ.
Non-binary qof dareensan in jinsi ahaan uusan isu aqoonsaneyn lab ama dhadig.

QAAB DHISMEEDKA SHARCIGA IYO SIYAASADDA

Tani waa macluumaad yar oo kuu oggolaan kara inaad si fiican u fahamto waddanka aad hadda ku nooshahay haddii aad tahay magangalyo-doon LGBTIQ ah.

GUUR

Malta gudaheeda waa suurtagal in laba qofba ay isguursadaan ama galaan midoobid shakhsiyeed. Tan waxaa ka mid ah xaq u lahaanshaha in laguu aqoonsado waalidka carruurtaada, helitaanka adeegyada caafimaadka taranka ama in la codsado in la noqdo waalid korsanaya. Tani waxay suurtogal noqon doontaa oo keliya ka dib marka laguu garto sharci qaxootinimo ama ilaalin hoosaad.

AQOONSIGA JINSIGA EE SHARCIGA AH

Malta gudaheeda, qof kastaa wuxuu go'aansadaa nafsadiisa inuu yahay nin ama naag, iyo inuu leeyahay lab, dheddig, ama jir lab-iyo-dhedig iskujira ah. Tani waxay sidoo kale ka dhigan tahay in qof kastaa uu xaq u leeyahay in loola dhaqmo iyadoo loo eegayo aqoonsigooda jinsiyeed mar kasta.

Qofka la siiyay magangalyada caalamiga ah oo raba inuu badalo jinsigooda sharciga ah wuxuu cadeyn ka sameysan karaa nootaayo wuxuuna u gudbin karaa Hay'ada Caalamiga ah ee Ilaalinta. Dukumiintiyadaada ayaa markaa wax laga beddeli doonaa si waafaqsan. Tani waxay ka dhigan tahay inaad sugto inta dalabkaaga magangalyo rabitaankaada looga go'aansanayo, si aqoonsigaaga jinsiga si sharci ah loo aqoonsado, iyo inaad yeelato dukumiinti aqoonsi oo ka tarjumaya aqoonsigaaga jinsiga iyo magaca aad doorbideyso. Weli waad dooran kartaa inaad ku noolaato si ku saleysan jinsigaaga intaad Malta joogto. Sidoo kale waa suurtogal inaad yeelato sumadeeyaha X halkii aad ka yeelan lahayd M ama F dukumiintiyadaada aqoonsiga.

HADAL NECEB KU SALAYSAN IYO DEMBIYADA NACAYBKA KU SALAYSAN

Malta gudaheeda, waa dambi ciqaab mudan in loo hadlo ama loo dhaqmo qaab u badan inay koox gaar ah ku kiciso nacayb iyo rabshad. Tan waxaa ku jira ficillo ama hadal dhiirrigelinaya nacayb ama rabshado loo geysto jinsi gaar ah, aqoonsiga jinsiga, nooca galmada, jinsiyadda, midabka, luqadda, asalka faraca, diinta ama caqiidada ama aragtida siyaasadeed.

Qof kasta, xaalad kasta ha lahaadee, waa laga ilaaliyaa waxyeellada, haddii aad dareentana inaad dhibbane u tahay fal-dambiyeed, waa inaad raadsataa taageero oo aad warbixin rasmi ah uga gudbisaa Ciidanka Booliska Malta. Qeybta Taageerada Dhibbanaha ee ka tirsan Ciidanka Booliska Malta ayaa sidoo kale ku caawin kara.

ADEEGYADA CAAFIMAADKA

Magangelyo-doonku waxay awoodaan inay helaan daryeel caafimaad oo deg-deg ah isla markaana ay daryeel u helaan xaaladaha maskaxda ee halista ah. Isbitaalka weyn ee Malta waa **Isbitaalka Mater Dei** kaas oo ku yaala Msida. Malta sidoo kale waxay leedahay xarumo caafimaad oo dhowr ah oo ku yaal deegaano kala duwan.

Dowladda Malta ayaa dejisay **Rugta Caafimaadka ee Jinsiga** oo bixiya adeegyo khaas ah oo loogu talagalay trans, jinsiga iyo dadka lab-iyo-dhedig iskujira ah. Rugtu waxay bixisaa adeegyo taageero nafsaani-bulsho ah oo ay ka mid yihiin kulamada cilmu-nafsiga iyo daaweynta qoyska iyo sidoo kale daaweynta codka iyo daawooyinka hoormoonka. U gudbinta rugta caafimaadka waxaa sameyn kara dhaqtarka qoyska, cilmu-nafsiga, la-taliye ama shaqaale bulsho. Adeegani waa u bilaash kuwa haysta sharciga qaxootinimo.

Ragga u galmooda ragga waxay halis weyn ugu jiraan in uu ku dhaco cudurka galmada lagu kala qaado (STI) sida HIV. Waxaad ka heli kartaa baaritaanka bilaashka ah ee STIs iyada oo loo marayo **Rugta caafimaadka GU** gudaha Isbitaalka Mater Dei. Dadka badankood waxay ku noolaan karaan nolol caafimaad leh oo caadi ah xitaa ka dib markii ay qaadaan cudurka 'STI', iyagoo daaweyn habboon isticmaalaya Daaweynta saxda ah ee HIV, qofku sidoo kale ma qaadsiin doono kuwa kale. Tijaabada rugtta waxaa sidoo kale diyaar u ah dadka magangalyo doonka ah ee wali ka sugaya go'aanka Hay'ada Ilaalinta Caalamiga ah ee ku aadan xaaladooda Malta.

Transgender Healthcare

IS-DHEXGALKA

Ururka Dhaqamada iyo Kahortaga Midabtakoorka waxay daryeeshaa hirgelinta maalinlaha ah ee Istaraatiijiyadda Isdhexgalka Muhaajiriinta iyo Qorshe Hawleedka. Waxay u adeegtaa inay tahay hay'adda dawliga ah ee ugu weyn ee xiriirisa taas oo bixisa macluumaadka, hesho codsiyada isdhexgalka waxayna daba-gal ku samaysaa horumarka ay muhaajiriintu ka gaareen isdhexgalka Malta **Barnaamijka 'Anigaa Leh'** ujeedadeedu tahay inay bixiso qaab dhammaystiran oo loogu talagalay isdhexgalka. Tallaabada ugu horreysa ee jihadaani waxay noqonaysaa aqoonta luqadaha rasmiga ah ee dalka iyo ku baraarujinta dhaqanka. Ururka dhaqamada iyo Ka-Tortaga Midabtakoorka waxay bixisaa koorsooyin laba marxaladood ah oo lagu kala barto Malta iyo Luqadda Ingiriiska iyo Fahansiinta Hiddaha iyo Dhaqanka. Macluumaadka iyo codsiyada: ibelongcourses@gov.mt

IBELONG